

Seattle Fire Prevention Division

220 3rd Avenue South

Seattle, WA 98104-2608 Email: permits@seattle.gov



Barnaamijka Baarista Gaariga Cuntada ee Gobolka

Seattle waxay ka qaybqaadanaysaa barnaamijka cusub ee baarista gaariga cuntada. Baabuurta cuntada waxay hadda liiska baarista ee gobolka ka heli karaan qayb kasta oo ka mid ah [waaxaha dabka ee ka qaybgalaya](#), baaristaasna waxaa sannad kasta aqoonsan doona dhammaan waaxyaha dabka ee ka qayb qaadanaya, oo ay ku jirto Seattle Fire Department. Adiga oo wata cadeynta baarista maamul kale, waxaad ruqsada gaariga cuntada oo qiimo jaban leh ka heli doontaa inta badan maamulada, oo ay ku jirto Seattle. Ruqsad ayaa guud ahaan looga baahan yahay maamul kasta oo aad ka hawlgasho. Marka lagu daro baarista liiska hubinta ee gobolka, kormeerayaashu waxay sameyn karaan baaritaanno dheeri ah inta lagu jiro dhacdooyinka si loo hubiyo howlaha ammaanka inta lagu guda jiro sanadka oo dhan.

Ruqsadaha

Gudaha Seattle, [baarista iyo ruqsada gaari cunto](#) waa \$422 (lambarka ruqsada 8206-TRK). Si kastaba ha noqotee, haddii aad la imaato nuqul ka mid ah liiska baarista ee gobolka ee ay fulisay maamul kale 12-kii bilood ee la soo dhaafay, ruqsada baabuurka cuntada ee Seattle waxaa loo dhimayaa \$352 (lambarka ruqsada 8206-RGL). Lacag celin ayaa la samayn karaa hadii aad lacag ku bixiso ruqsada Seattle ee dhanka baarista kadibna baarsita uu sameeyo maamul kale. Codsiyada ruqsada waxaa laga heli karaa websaydkeena: <http://www.seattle.gov/fire/business-services/permits#howtoapplyforapermit>

Baaritaanada

Garigaaga cuntada waa inuu maraa baarista waaxda dabka sanad walba. Dhamaan maamulada ka qeybgalaya waxay adeegsan doonaan [liiska baarista ee gobolka](#) inta lagu guda jiro baaritaanadan waxaana laga yaabaa inay lahaadaan shuruudo dheeri ah oo u gaar ah maamulkooda. Waxaad la imaan kartaa caddeyn baaris oo lagu sameeyay 12-kii bilood ee la soo dhaafay oo lagu sameeyay maamullada ka qaybgalaya halkii aad ka dhammaysan lahayd baaritaanada sannadlaha ah ee dheeraadka ah ee maamul kasta.

Gudaha Seattle, ka dib markaad hesho ruqsadaada, waxaad bilaabi kartaa hawlo. Kormeeraha Seattle Fire Department wuxuu imaan doonaa isagoo aan la shaacin si uu u baaro gaarigaaga cuntada ugu yaraan hal mar 12ka bilood ee soo socda. Looma baahna in jadwal loo sameeyo baaris ama aad gaarigaaga u kaxayso meel cayiman si loo baaro. Kormeeraha wuxuu isticmaali doonaa [liiska baarista ee gobolka](#) inta baarista socoto. Marka baarista la dhammeeyo, waxaad warbixinta baarista ku heli doontaa iimayl ahaan. Daabac oo keydi nuqul ka mid ah warbixinta baarista oo ay la socdaan ruqsadahaaga oo caddeyn u ah baaristaada gobolka marka aad u safreyso maamulada kale ee ka qeyb galaya.

Fadlan la soco in baarista Seattle la samayn karo waqti kasta inta lagu jiro sanadka ka dib markaad hesho ruqsadaada mana heli doontid warbixin baaris oo dhammaystiran illaa iyo inta ay baarista ka dhammaato. Haddii kormeeraha uusan awoodin inuu helo gaarigaaga inta lagu guda jiro sanadka gudihiiisa oo aadanna keenin cadeynta baarista gobolka, waxaa lagaa codsan karaa inaad gaarigaaga keento meel cayiman si loo baaro. Fadlan dib u eeg macluumaadka ku jira maamul kasta websaydkiiisa markaad dooraneyso maamulka aad rabto inaad la sameeyo jadwal baaris.